Macluumaad ku jira Somali

La-talinta mustaqbalka ee La Sainte Union Catholic Secondary School

Camden waa meel cajiib ah oo wax lagu barto, waxaana ku faannaa iskuulaadan heerka sare ah iyo shaqaalaheenna oo maalin kasta si adag uga shaqeeya inay carruurta siiyaan waxbarashada ugu wanaagsan.

Waxaan rabnaa in ilmo kasta oo Camden ah uu yeesho meel dugsi oo ku habboon baahiyahooda si loo siiyo jawiga ugu wanaagsan si ay wax u bartaan, u yeeshaan saaxiibo una horumaraan.

Iskuulada ku yaalla Camden iyo guud ahaan London ayaa wajahaya cadaadis dhaqaale oo sii kordhaya.

Hoos u dhaca heerka dhalmada iyo qoysaska ka guuraya London ayaa keenay in ay yaraadaan carruurta buuxin karta boosaska iskuulada; taas oo sababtay in tirada ardaydu ay yaraato, iskuuladana ay yeeshaan boosas bannaan oo dheeraad ah.

Boos kasta oo banaan wuxuu ka dhigan yahay in iskuulada hoose ay sannadkii lumiyaan celcelis ahaan £7,500 oo ka mid ah maalgelinta muhiimka ah ee Dowladda, halka iskuulada sare ay lumiyaan celcelis ahaan £9,700 sannadkii.

Golaha ahaan, waxaa naga saaran waajib ah inaan xaqiijinno inay jiraan kaalmo waxbarasho oo ku filan, tayo sare leh, isla markaana waara, iyo inaan si hufan u maamulno kaalmahaas waxbarasho.

Maadaama tirada ardaydu ay hoos u dhacayso, waxaa lagama maarmaan ah inaan arrintan u maamulno si dhow oo aan isaga kaashanayno iskuulada.

Sanadkii la soo dhaafay, iyadoo qayb ka ah Barnaamijkeenna ku saabsan Tayeynta iyo Dhammaystirka Baahiyaha Iskuulada, waxaan si dhow ula shaqeynaynay dugsiyada si gaar ah ay u saameeyeen arrimahani, si aan uga taageerno inay wax ka qabtaan caqabadahan.

In kasta oo ay jirto dadaal iyo go'naansho dhinaca dadka oo dhan ah, haddana **Dugsiga Sare ee Katooliga ee La Sainte Union** wuxuu ka mid yahay afar dugsi oo weli wajahaya cadaadisyo aad u daran oo joogto ah – kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- tirada badan ee kuraasta bannaan ee ardayda
- iyo cadaadis dhaqaale oo sii kordhaya

Taariikhdu markay ahayd 12-kii Oktoobar 2026, waxaan soo saarnay warbixin ku talinaysa in la sameeyo wadatashi ku saabsan mustaqbalka **Dugsiga Sare ee Katooliga ee La Sainte Union.** Taariikhdu markay ahayd 20-kii Oktoobar 2026, Xubnaha Golaha Fulinta ee Camden (Camden's Cabinet Members) – oo ah kooxda xildhibaannada hoggaaminaya – ayaa kulmay waxayna go'aansadeen inay sii wadaan wadatashigaas.

Wadatashigu wuxuu hadda furan yahay muddo 6 toddobaad ah, laga bilaabo 9-ka subaxnimo ee 2-da Nofeembar ilaa 9-ka subaxnimo ee 14-ka Disembar 2026 – markaa fadlan dhiibo ra'yigaaga.

- Qof kastaa wuxuu ka qayb qaadan karaa wadatashiga isagoo isticmaalaya internetka, booqo: **consultations.wearecamden.org/schools/lasainteunion**
- Haddii ilmahaagu uu dhigto **Dugsiga Sare ee Katooliga ee La Sainte Union,** oo aad doorbidayso inaad buuxiso foom wadatashi oo warqad ah, waxaad nuqul daabacan ka soo qaadan kartaa dugsiga, kadibna dib ugu celin kartaa. Dadka kale waxay farriin iimayl ah u diri karaan:**lasainteunionconsultation@camden.gov.uk**
- Si aad u hesho buug-yaraha wadatashiga oo ku qoran qaab si fudud loo akhrin karo (EasyRead) ama luuqado kale, fadlan iimayl u dir: **lasainteunionconsultation@camden.gov.uk**

Waxaa sidoo kale jiri doona kulamo – ha ahaadaan kuwo online ah ama kuwo fool-ka-fool ah – oo loogu talagalay waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha carruurta dhigata dugsiga. Macluumaad dheeraad ah ayaa si toos ah loogu gudbin doonaa iyaga.

Waxaa lagaa weydiin doonaa ra'yigaaga ku saabsan xulashooyinka soo socda, waxaana laguugu dhiirigelinayaa inaad soo jeediso ama tilmaamto xulashooyin kale oo dheeraad ah.

- In la yareeyo tirada kuraasta la bixiyo iyada oo la dhimayo Tirada Ogolaanshaha ee la Shaaciyey (Published Admission Number - PAN) ee dugsiga.
- In Dugsiga La Sainte Union lagu biiriyo dugsi sare oo kale (qaab iskaashi maamul), taas oo macnaheedu yahay in dugsigu uu maamul guud la wadaago ugu yaraan hal dugsi oo kale.
- In la xiro qaybta dugsiga ee loogu talagalay Fasallada 7 ilaa 11, iyadoo isla markaana la haynayo oo dib loo habeynayo qaybta waxbarashada ee ka dambeysa da'da 16-ka (Fasallada 12 ilaa 13/14).
- Xiritaanka Buuxda ee Dugsiga Sannadaha 7aad ilaa 13/14.

Kahor intaadan ka jawaabin wadatashiga, waxaan si xooggan kuugu dhiirigelinaynaa inaad akhrido xirmada wadatashiga, taas oo sharraxaysa xogta dugsiga iyo mid kasta oo ka mid ah xulashooyinka si faahfaahsan.

Inta lagu jiro wadatashiga, waxaan ururin doonnaa caddayn ku saabsan saameynta ikhtiyaar kasta oo dugsi kasta ah.

Caddayntan waxaa lagu qeexi doonaa warbixin waxaana loo isticmaali doonaa in lagu wargeliyo tallaabooyinka xiga ee la soo jeediyay, kuwaas oo xubnaha Golaha Wasiirradu ay go'aan ka gaari doonaan Febraayo 2027.

Macluumaad dheeraad ah

- Soo dejiso oo akhri dukumeentiga **consultations.wearecamden.org/schools/lasainteunion**

- Ka hel jawaabaha su'aalaha, nuxur si fudud loo akhrisan karo (EasyRead), iyo macluumaad luuqado kale ah bogga **camden.gov.uk/SchoolConsultations**
- Waxaad su'aalahaaga u soo diri kartaa cinwaanka **lasainteunionconsultation@camden.gov.uk**

Tallaabooyinka la filayo in la qaado ka dib la-tashiga socon doona muddo lix toddobaad ah:

- **Febraayo 2027:** Xubnaha Golaha Fulinta (Cabinet) ayaa dib u eegi doona natiijada la-tashiga, iyagoo tixgelinaya arrimo kale, waxayna go'aamin doonaan ikhtiyaarka loo qaadanayo dugsi kasta.
- **Febraayo 2027:** Haddii xubnaha Golaha Fulinta ay go'aansadaan soo-jeedin ku saabsan in dugsi la mideeyo ama la xiro, waxaa xigi doona muddo afar toddobaad ah oo sharci ahaan loo qoondeeyay la-tashi rasmi ah. Muddadaas, dugsiga, waalidiinta, xannaaneeyayaasha, iyo daneeyayaasha kale waxay fursad u heli doonaan inay mar kale fikirkooda ka dhiibtaan soo-jeedintaas.
- **Abriil 2027:** Golaha Fulinta ayaa qaadan doona go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan soo-jeedin kasta.
- **Abriil ilaa Maajo 2027:** Haddii go'aanku saameyn ku yeesho shaqaalaha dugsiga, waxaa bilaaban doona habraac la-tashi rasmi ah oo loogu talagalay shaqaalaha dugsiga.
- **Taariikhda hirgelinta:** Tani waxay ku xirnaan doontaa isbeddelka lagu heshiiyo (haddii uu jiro). Isbeddelada waxaa la hirgelin karaa laga bilaabo sannad-dugsiyeedka soo socda (Sebtembar 2027).

Waan ognahay in tani ay tahay war adag in la maqlo, balse waa inaan hadda tallaabo qaadnaa si aan uga hortagno in xaaladdu ka sii darto, isla markaana aan u ilaalinno adeegga waxbarasho ee tayo leh ee deegaankeenna, kaas oo loogu talagalay dhammaan carruurta degmada, hadda iyo mustaqbalkaba.

Waxaan sidoo kale ognahay in tani ay tahay xilli walaac iyo welwel ku abuuraya. Ilaa hadda wax go'aan ah lama gaarin, waxaana sii wadi doonnaa inaan idinla socodsiinno wixii horumar ah.